



Sida lagu garto, sida looga fogaado, iyo sida luuqad kasta looga soo warbixiyo qalinshubato



Qalinshubatadu afkaaga hooyo ayey kugula hadli karaan. Sababtaas awgeed FTC ayaa hadda luuqad kasta wax loogu soo gudbin karaa. Si aad warbixin ugu soo gudbiso luuqadaha Maandarin, Tagaloog, Fiyetnaameys, Faransiis, Carabi, Kuuriyaan, Ruush, Boortaqiis, Boolandeyis, iyo luuqado kale, soo

garaac FTC (877) 382-4357. Taabo lambar 3 si aad u hesho turjubaan. Si aad u soo sheegto xatooyo, soo garaac (877) 438-4338 oo taabo lambarka luuqadda aad rabto. Taleefanka waxaa laga jawaabaa 9ka aroornimo ilaa 5ta galabnimo Wakhtiga Dhanka Bari.

Intarnetka wax ma ku s sheegeysaa? Qof ha kugu caawiyo in aad afka Ingiriiska wax noogu soo sheegto [ReportFraud.ftc.gov](https://www.ftc.gov/identitytheft) ama IdentityTheft.gov. Isla markiiba waxaad heleysaa talooyin ah waxa aad sameyn doonto.

Laakiin sug, waxyaabo kale oo badan. Hadda waxaad talooyin ku heli kartaa luuqado badan [ftc.gov/languages](https://www.ftc.gov/languages). Halkaas waxaad ka baran kartaa sida looga fogaado qalinshubatada, waxaad sameyneyso haddii ay qalinshubato lacag kaa qaadato, iyo sida looga fogaado in ay meheraddaada yar soo beegsadaan. Waxaa jira buugyaraha qalinshubatada oo loogu talagalay dadka dhawaan yimid Mareykanka.

Ma dooneysaa in aad hesho macluumaad daabacan? Barta [ftc.gov/bulkorder](https://www.ftc.gov/bulkorder), waa neel laga dalban karo waraaqo ku qoran luuqado badan. Hadda, codso Sida Looga Fogaado Qalinshubatada iyo Qalinshubatada iyo Meheraddaada Yar oo ku qoran luuqadaha Shiineyska Fudud, Kuuriyaan, iyo Fiyetnaameys. Laakiin, qofkii raba, ha booqdo [ftc.gov/ordenar](https://www.ftc.gov/ordenar) si uu uga dalbado afka Isbaanishka.

Mar kasta oo aad hesho macluumaadka FTC oo ku qoran waraaqo ama intarnetka, la wadaag qoyskaaga iyo asxaabta aad xiriirtaan. Markaad dadka u sheegto wixii aad ka ogtahay qalinshubatada oo aad ka soo warbixiso wixii aad aragto, waxa aad gacan ka geysaneyso waa joojinta qalinshubatada bulshada dhibeysa.